

Waaxda socdaalka (imaagareeshinka) ayaa bixinaysa shahaadooyinka xuquuda shaqo qabasho ee qofka magangelyaddoonka ah laga billaabo 1.9.2019

Laga billaabo 1.9.2019 shaqo bixiyuhu wuxuu ka codsan karaa Waaxda socdaalka (imaagareeshinka) shahaadado ku saabsan xuquuqda shaqo qabasho ee qofka magangelyoddoonka ah. Waaxda socdaalka (imaagareeshinka) waxaa ay shahaadada u soo direysaa qofka magangelyoddoonka ah, kaasoo shahaadadaas loo soo diray tusi kara shaqo bixiyihiisa.

Isbeddelkan awgiis ayaa laga billaabo 30.9.2019 waxaa la xirayaa khadkii adeegga telefoonka ee shaqo bixiyaha.

Sidoo kale xitaa qofka magangelyoddoonka ah ayaa codsan kara shahaadada xuquuqda shaqo qabashada, taasoo ah mid lacag ah.

Sidee ayuu shaqo bixiyuhu u hubsan karaa xuquuqda shaqo qabasho ee qofka magangelyoddoonka ah?

Shaqo bixiyaha waxaa ku waajib ah in uu hubiyo, in qofka shaqaalaha ah uu xuquuq u leeyahay shaqo qabashada iyo inkale. Waxaana shaqo bixiyuhu uu arrinkaas ku ogaan karaa, isagoo weydiinaya qofka shaqaalaha ah. Sidoo kale wuxuu shaqo bixiyuhu codsan karaa shahaadada xuquuqda shaqo qabashada qofka magangelyoddoonka ah, taasoo dalbashadeeda lacag lagu bixinayo.

Sidan soo socota ayaad ku dalban kartaa shahaadada xuquuqda shaqo qabasho ee qofka magangelyoddoonka ah

1. Waxaad bixisaa kharashka ka baaraandegista codsiga shahaadada oo dhan 20 €. Marka aad codsiga samayso waxaad u baahan tahay rasiid. Warbixinta ku saabsan qaabka lacagta loo bixinayo waxaad ka heleysaa foomkan.

2. Buuxi foomka: [Codsiga ka helitaanka Waaxda socdaalka xuquuqda shaqo qabashada: Pyyntö työnteko-oikeustodistuksen saamiseksi Maahanmuuttovirastolta.](#)

3. Foomka iyo rasiidka aad lacagta ku bixisay, waxaad u dirtaa cinwaanka iimaylka ee ah: migri@migri.fi. Sidoo kale waxaad foomka ku diri kartaa cinwaanka boostada ee ah:

PL 10 00086 Maahanmuuttovirasto.

4. Waaxda socdaalka ayaa waxaa ay shahaadada u direysaa shaqaalahaada.



Xaggee ayuu qofka magangelyoddoonka ah ka helayaa warbixinta ku saabsan xuquuqdiisa shaqo qabashada?

- Marka qofku uu codsanayo magangelyada ayaa waxaa la siinayaa qoraal ku saabsan "warbixinta xuquuqda shaqada", taasoo uu ka helayo warbixinta la xiriirta waqtiga xuquuqda shaqo qabashadu ay bilaabanayso.
- Xuquuqda shaqo qabashada waxaa sidoo kale aad ka hubin kartaa go'aanka ama kaarka ciqaamadda.
- Qofka magangelyoddoonka ah waxaa markii uu u baahdo uu codsan karaa shahaadada xuquuqda shaqo qabashada ee lacagta ah.
- Xuquuqda shaqo qabashada waxaa looga hadlayaa qoraalka ku xusan cinwaanka internetka ee ah: migri.fi/turvapaikanhakijan-tyonteko-oikeus

Goorma ayuu qofka magangelyoddoonka ah xaq u leeyahay in uu shaqeeyo?

Qofka magangelyoddoonka ah wuxuu xaq u leeyahay inuu ka shaqeeyo Finland gudaheeda saddex illaa lix bilood gudahood, laga soo billaabo marka uu codsaday magangelyada.

Xadku waa saddex bilood, haddii uu qofka magangelyoddoonka ah u dhiibay hawlwadeennada dowladda baasaboor ama dukuminti kale oo dhab ah oo shaqaynaya, haddiise uusan qofka magangelyoddoonka ah u dhiibin hawlwadeennada dowladda wax dukuminti dhab ah oo shaqaynaya, waxaa xadku uu noqonaayaa lix bilood.

Xuquuqda shaqo qabashada qofka magangelyoddoonka ah waxaa ay dhammaanaysaa marka uu go'aanka qofka magangelyoddoonka ah laga gaaray uu yahay mid dhaqangelin u diyaar ah, taasoo loola jeedo marka qofka magangelyoddoonka ah laga saari karo dalka, ama marka uu go'aanku yahay mid sharci ahaan dhaqangal ah, taasoo loola jeedo inaan mar dambe go'aankaas wax racfaan ah laga qaadan karin.

Haddii uu ahaa go'aanka qofka magangelyoddoonka ah mid dhaqangelin u diyaar ah kahor 1.6.2019, xuquuqda shaqo qabashadu waxaa ay dhammaanaysaa marka go'aanku uu yahay mid sharci ahaan dhaqangal ah. Haddii go'aanku uusan ahayn mid dhaqangelin u diyaar ah ah kahor 1.6.2019, xuquuqda shaqo qabasho ee qofka magangelyoddoonka ah waxaa ay dhammaanaysaa , marka uu go'aanku yahay mid dhaqangelin u diyaar ah.